




Caasha iyo Canab





Caasha iyo Canab

Buugga 13^{aad}

Fasalka 2^{aad}



Buuggan waxaa maalgaliyay hay'ada USAID Waxaana isla diyaariyay PACT ETHIOPIA iyo xafiiska waxabarashada DDSI. Waxaana dib u habayn iyo daabacaad ku sameeyay hay'ada Save the children iyo wasaarada wax barashada heer federal

2008 T.I.




The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>



Caasha iyo canab waa
labo gabdhood oo saaxiibo
ah oo degan tuulo ka
mid ah deegaankeena.



Caasha iyo canab waa isku xaafado marwalbana waxay isu soo raacaan dugsiga. Caasha waxay dhigataa fasalka 2^{aad} B, canabna waxay dhigataa fasalka 2^{aad} T.




Maalin maalmaha ka mid
ah ayay caasha booqatay
saaxiibteed canab
waxayna ku tidhi saaxiib
miyaadan ogeyn inaan
bari galayno imtixaan.



Canab ayaa tidhi saaxiib
waan ogahay laakiin
waxaan rabaa inaan
akhriyo maadada aan
barri galayno ee ii sheeg?



Caasha ayaa tidhi saaxiib
waxaan galaynaa maadada
cilmiga deegaanka, marka
saaxiib ka waran hadii
aan su'aalo iska weydiino
maadadaas?



Caasha ayaa ku jawaabtay
waa sax saaxiib maxaa
yeelay su'aaluhu waxay
inoo fududeenayaan
fahanka imtixaanka.

Caasha: imisa ayaa loo qaybiyaa xayawaanada?

Canab: waxaa loo qaybiyaa labo duurjoog iyo dabjoog

Caasha: waxaad sheegtaa qaar kamid ah xayawaanada duurjoogta ah?

Canab: waxaa ka mid ah sida; libaaxa, shabeelka iyo geriga canab

ayaa markan bilowday
su'aalaha waxayna tidhi
Canab: waxaad
sheegtaa qaar ka mid
ahxayawaanada dab
joogta ah?

Caasha: waxaa ka
mid ah sida bisadaha,
dameeraha iyo fardaha.
Halkaas ayay ku
dhamaatay wada
sheekaysigii caasha iyo
canab.

